IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريـــدة الرسميـــة

Sannadka 13aad Muqdisho 30da Dis. 1985, L. 2 R 12

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda **Lacagta**.

## K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 43 ee 12 Bog; Dis. 1985, Siin Dhul Beereed. 830

XEER WASAARADDA MAALIYADDA L. 9 ee 10 Dis 1985, Soo saaridda Lacagta Cadadiga ee 1 Shilin iyo 50 senti. » 832

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 15.12.85, Lumid Buug-Kayd L. 25845 ku qoran Nasra Nuur Axmed L. 533 » 833

MAXKAMADDA G· BANAADIR, 25·12.85 » 834
Lumid Jeeg· L. 631775 ku qoran Maxamed Saciid Mire L. 534

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 23.12·85, » 835
Lumid Jeeg War· L· 0065425 ku qoran Saciid Maxamed Aadan L· 535

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 26.12.85, » 836
Lumid Jeeg War. L. 86467 ku qoran Cali Macallin Ibraahim L· 536

MAXKAMADDA G· BOOSAASO, 11.12·85, » 837
Lumid Jeeg.War· L. 643555 ee ku qoran Maxamed Cusmaan Maxamed L· 537

MAXKAMADDA G· TOGDHEER, 16·12.85, » 838
Lumid Saddex Jeeg· War. L· 035357-0353580-0353579 ku qoran Ibraahim X. Cabdi L· 538

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 25·12·85, » 839
Lumid Jeeg·War. L· 0365084 ku qoran Cali Sheekh Axmed L. 539

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 25·12·85, » 840
25,12,85 Lumid Jeeg War· L· 364334 ku qoran Cali Sheekh Axmed L· 542

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 25·12·85, » 841
Lumid Jeeg·War. L· 0364128 ku qoran Cali Sheekh Axmed L. 541

MAXKAMADDA G· BANAADIR, 29.12.85, » 842
Lumid Jeeg War. L· 0200934 ku qoran Cabdikariin Shaaciye Maxamed L· 542

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 43 ee 12 Dis. 1985, Siin Dhul Beereed.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Warqadda Codsiga ee Sheekh Cali Bin Axmed Aal-Taani;

MARKUU ARKAY: Warqadda lambar WB/XW/F-77-1132/85 ee 29.10.1985, kana soo baxday Xafiiska Wasiirka Wasaaradda Beeraha;

MARKUU TIXGOLIYEY: Xiriirka walaaltinnimo ee Soomaaliya iyo Qadar;

WUXUU XEERIYEY

Qod. 1aad

In danta guud awgeed laga wareejiyey dhul dhan 36.0 Ha beerta Naaxinta ee Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa ee ku taal Tuulada Mareeray ee Degmada Afgooye, sida ku cad naqshadda dhulkaas loo sameeyey.

Qod. 2aad

In danta guud awgeed laga wareejiyo Beerta Tubaakada ee Wasaaradda Wershadaha iyo Ganacsiga ee ku taalla Tuulada Mareeray, ee Degmada Afgooye, dhul dhan 72.0 Ha oo ugu xiga Webiga Beerta Xannaanada Xoolaha iyo waddada isku ixrta Afgooye iyo Tuulada Mareeray, kuna cad naqshadda loo sameeyey Beertaas.

Qod. 3aad

Intaa iyadoo la tixgelinayo dan guud, xiriirka walaaltinnimo iyo himilooyinka maalgelinta Carbeed ee Waddammada Carabta iyo dhiirrigelinta kordhinta wax soo saarka tacabka beeraha ee dalalka Carbeed, ayaa labada dhul ee ku xusan qodobbada koowaad iyo labaad oo isku noqonaya 108.0 Ha lagu wareejiyey SHEEKH CALI BIN AXMED AAL-TAANI (mulki ahaan).

Qod. 4aad

Wasaaradaha Wershadaha iyo Ganacsiga iyo Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa waxa la farayaa inay dhulkaas ku wareejiyaan qofka la siiyey; Wasaaradda Beerahana waxa lagu amrayaa inay bixiso wixii rukhso ah ee la xiriira hirgelinta iyo dhammaystir tacabka dhul beereedkaas.

Qod. 5aad

Dekreetadan waxa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 12 Dis. 1985

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER WASAARADDA MAALICADDA, L. 9 ee 10 Dis. 1985, Soo saaridda Lacagta Cadadiga ee 1 Shilin iyo 50 Senti.

WASIIRKA WASAARADDA MAALIYADDA

MARKUU ARKAY: Qodobka 4 ee Xeerka 6da Maarso 1961 ee loo beddelay Sharciga 23ka Maarso 1961 Lr. 13 kuna saabsan Nidaamka Lacagaha Soomaaliyeed;

MARKUU ARKAY: Qodobka 4 ee Sharciga 5ta Juunyo 1962 Lr. 2 kuna saabsan nidaamka sameynta, soosaaridda iyo wareeg-galinta lacagta xaashida iyo tan cadadiga ee Shilin Soomaaliga ah;

MARKUU ARKAY: Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya Lr. 18 ee 10kii Setember 1976;

ISAGOO TIXGELINAYO: In gundhiggii lacagtii hore ee 1ka Shilin iyo 50 sentiga uu haatan sii dhamnayo;

ISAGOO GARTAY: Baahida loo qabo in la gooyo taariikhda ay dhaqan galeyso lacagtaasi;

AYADA UU SOO JEEDIYAY Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

WUXUU SOO SAARAYAA

Qod. 1aad

Lacagta cadadiga cusub ee 1 Shilin iyo 50 senti oo tilmaamaheeda iyo summadaheeda lagu carrifay Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya Lr. 18 ee 10kii Setember 1976, tiradeeduna tahay 15.000.000, min 1 Sh.So. iyo 2.500.000, min 50 senti, waxay dhaqan geleysaa kuna soconaysaa Dalka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya oo dhan laga bilaabo 1da Jannaayo 1986.

Haddaba, waxaa Bankiga Dhexe ee Soomaaliya loo oggolaanayaa inuu lacagtaas wareeg-geliyo laga bilaabo taariikhda 1da Jannaayo 1986.

WASIIRKA WASAARADDA MAALIYADDA
Dr. Maxamed Sheekh Cusmaan

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Codsiga dcsha ku qoran;

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Buug Kayd Lam. 25845 lagana sameeyay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 4.492,44/= kuna qoran magaca Nasra Nuur Axmed sida ku cad warqadda Lam. 005025 taariikhdeeduna tahay 11.12.85 kana soo baxday Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962;

WUXUU XE4RIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 25845 lagana sameeyay Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Nasra Nuur Axmed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 4.492,44/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Nasra Nuur Axmed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 4.492,44/= ee ku qoran Buugga kor ku tilmaaman kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 15.12.85

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. CabdiSalaad Shangole)

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO
MGT/194/85KA
UJ:— Baafin Jeegagga Wareega ee Lam/yahay 631775 iyo 594989;
(GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. TOGDHEER)
HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Jeegagga Wareega ee lam/yahay 631775 ee xambaarsan Sh.So. 20.000/= ku taariikhaysan 19.9.85ka iyo 594989 ee xambaarsan Sh.So. 20.000/= ku taariikhaysan 21.9.85ka ee uu soo qortay Jaalle Maxamed Saciid Mire Tr. 23.11.85ka;
HADDUU ARKAY: Ogeysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka L. Burco Tr. 23.11.85;
HADDUU ARKAY: Qod. 69,65 lumid Jeegagga Wareega ee kor ku xusan ee kala ah 631775 ee xambaarsan Sh.So. 20.000/= ku taariikhaysan 19.9.85 kuna qornaa Jaalle Aadan Cali Xuseen iyo Jeegga Lam. 594989 ee xambaarsan Sh.So. 20.000/= ku taariikhaysan 21.9.85ka kuna qornaa Jaalle Axmed Ibraahim, Jeegga 1aad waxa laga sameeyey Laanta Hargaysa Jeegga 2aadna waxa laga sameeyey Laanta Boorame Jeegaggaasoo loo baafiyey Jaalle Maxamed Saciid Mire.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegagga kor ku xusan J/lle Maxamed Saciid Mire markii ay ka soo wareegto 20 Casho gudahood laguna shaaciyo X. Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegaggaas cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro J/le Maxamed Saciid Mire iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

BURCO, 26.11.85

Guddoomiyaha Max. G. Togdheer Burco
(Dr. Abuukar Islaw Cumar)

Kaaliyaha Max. G. Togdheer Burco
(Jaamac C. Bile)

L. 540

MAXKAMADDA GOBOLKA BANADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Dacwadda Kor Ku Qoran:

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeega War.

Lam. 0065425 lagana sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 4aad kuna jirto Lacag dhan Sh,So, 25.000 kuna qoran magaca Saciid Maxamed Aadan sida ku cad warqadda Lam. — Tr. 14,12,85 kana soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 4aad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9,9,1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lambar 0065425 lagana sameeyey Laanta 4aad ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed ayna ku jirto Lacag dhan Sh,So, 25.000 kuna qoran magaca Saciid Maxamed Aadan.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 4aad ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Saciid Maxamed Aadan Lacagta Cadadkeedu yahay Sh,So, 25.000 ee ku qornayd Jeegga War. ee k kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho. 23,12,85.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADR

Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 535

MAXKAMADDA GOBOLKA BANADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Dacwadda Kor Ku Qoran:

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeega War. Lam. 86467 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Afraad kuna jirto Lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Cali Macalin Ibraahim Nuur sidaa ku cad warqadda Lam 10227 tr. 26,12,85 kana soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xis. Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9,9,1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 86467 Lagana sameeyey Laanta Kismaayo ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed ayna ku jirto Lacag dhan Sh,So, 100.000 kuna qoran magaca Cali Macalin Ibraahim Nuur.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Kismaayo ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Cali Macalin Ibraahim Nuur Lacagta Cadadkeedu yahay Sh.So, 100.000 ee ku qornayd Jeegga War. ee kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26,12,85

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADR

Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 536

## MAXKAMADDA GOBOLKA BOOSAASO

Ujeeddo Qoraal Degereeto.

Ku: Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Ummadda Laanta Boosaaso.

HADDUU ARKAY: Dacwadda J/le Maxamed Cusmaan Maxamed, ee 11,12,85, Taasoo sheegaysa inuu ka Lumay Jeeg War. ee Lam. Yahy 643555, ee 16,4,85 ee ay ku qoran tahay Sh,So, 50.000 Lagana sameyey Bangiga Boosaaso.

HADDAN ARKAY: Warqadda Banagiga Ganacsiga iyo Keydka Ummadda Laanta Boosaaso, ee Taariikhdeedu Tahay 6.11.85, Caddeynaysa Lumidda J/aas.

HADDAN ARKAY: Qod. 69 D.L.9,9,65 N. 2. Waxaan Caddeynayaa Lumidda J/aas, ee uu leeyahay Jaale Maxamed Cusmaan Maxamed.

### WAXAAN AMRAYAA

In Dib loogu celiyo, oo loo sameyey Lacagtii ku qorayd Jeegii Lumay, ee Lam. ahaa 643555, ee 16,4,85, ayna ku qorayd Sh,So, 50.000 uuna leeyahay J/le Maxamed Cusmaan Maxamed, Sidaas awgeed waa in la siiyaa Lacagta ku qoran Jeegaas aan kor ku soo sheegnay markay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta lagu Faafiyo Degreetada Rismiga ah ee Dawladda.

Boosaaso, 11.12.85

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Bari Boosaaso
Cabdullaahi Xirsi Cumar.

L. 537

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

MGT/217/85

UJ: Baarin Jeegag Wareega ee Lumay;

(Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco)

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Jeegagga Wareega ee Lumay Lam. 1— 0353577 Sh. So. 100,000/= ee 10.12,85, 2— 0353580 Sh.So. 100,000/= ee 10.12.85, 3— 0353579 Sh.So. 100,000/= ee 10.12.85;

HADDUU ARKAY: Qod. 69,65) Lumid Jeegagga Wareega ee kor ku xusan ee uu ku qoran yahay Ibraahin X. Cabdi Cilmi waxayna ka lumeen Jeegaggaasi loona Baafiyey Cumar Maxamed Cabdi lagana sameeyey L. Hargaysa.

WUXUU AMRAYAA

In loo Cusboonaysiiyo Jeegaggaas Wareega ee kor ku xusan J/le Cumar Maxamed Cabdi markii ay ka soo wareegto 20 casho laguna shaaciyo Xafiiska Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegagga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro J/le Cumar Maxamed Cabdi iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

BURCO, 6.12.85

Guddoomiyaha Max. G. Togdheer Burco

(Dr. Abuukar Islaw Cumar)

Kaaliyaha Max. G. Togdheer

(Jaamac Cabdullaahi Bille)

L. 538

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Codsiga Dusha Ku Qoran:

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeega Lam. 0365084 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa ku jirto Lacag dhan Sh,So, 100.000 kuna qoran magaca Cali Sheekh Axmed Sidaa ku cad warqadda Lam. 10198 Tr. 25,12,95 kana soo baxday Laanta Xis. Guud Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9,9,1962.

WUXUU XEERIYAY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 0365084 lagana sameeyay Laanta Hargaysa ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Cali Sheekh Axmed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Hargaysa ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo J:lle Cali Sheekh Axmed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000/= ee ku qornayd Jeegga kor ku tilmaaman kaddib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo marka go'aanka lagu dabaaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.12.85

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdi Salaad Shangolle)

L. 539

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Codsiga dusha ku qoran;

HADDUU TIXGALIYAY: In uu dhumay Jeeg Lam. 0366457 lagana sameeyay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargaysa ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca Cali Sheekh Axmed sida ku cad warqadda Lam. 10198 taariikh 25.12.85 kana soo baxday Laanta Hargaysa ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9,1962;

WUXUU XEERIYAY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 0366457 lagana sameeyay Laanta Hargaysa ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Cali Sheekh Axmed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/=

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Hargaysa ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Cali Sheekh Axmed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000/= ee ku qornayd Jeegga Kor ku tilmaaman kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo marka go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.12.85

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdi Salaad Shangolle)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Codsiga dusha ku qoran;

HADDUU TIXGALIYAY: In uu dhumay Jeeg Lam. 0364128 lagana sameeyay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargaysa ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca Cali Sheekh Axmed sida ku cad warqadda Lam. 10198 taariikh 25.12.85 ka soo baxday Laanta Xis-Guud ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9,1962;

WUXUU XEERIYAY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 0364128 lagana sameeyay Laanta Hargaysa ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Cali Sheekh Axmed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Hargaysa ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Cali Sheekh Axmed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000/= ee ku qornayd Jeegga kor ku tilmiiman kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo marka go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.12.85

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdi Salaad Shangolle)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Codsiga dusha ku qoran;

HADDUU TIXGALIYAY: In uu dhumay Jeegga Wareega Lam. 0364334 lagana sameeyay Bangiga Ganacsiga iyo Gaydka Soomaaliyeed Laanta Hargaysa kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100.000/= kuna qoran magaca Cali Sheekh Axmed sida ku cad warqadda Lam. 10198 taariikh 25.12.85 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargaysa;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962;

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 0364334 lagana sameeyay Laanta Hargaysa ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca Cali Sheekh Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Hargaysa ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Cali Sheekh Axmed lacagta cadadkeeda yahay Sh.So. 100.000/= ee ku qornayd Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho. 25.12.85

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdi Salaad Shangolle)

L. 543

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Codsiga desha ku qoran;

HADDUU TIXGALIYAY: In uu dhumay Jeeg Lam. 0200934 lagana sameeyay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco ku jirto lacag dhan Sh.So. 40.000/= kuna qoran magaca Cabdikariin Shaaciye Maxamuud sida ku cad warqadda Lam. 10252 taariikh 23.12.85 kana soo baxday Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962;

WUXUU XEERIYAY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 0200934 lagana sameeyay Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Cabdikariin Shaaciye Maxamuud ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 40.000/=;

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Cabdikariin Shaaciye lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 40.000/= ee ku qornayd Jeegga kor ku tilmaaman kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo marka go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 29.12.85

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdi Salaad Shongole)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dawadda kor ku qoran;

HADDUU TIXGALIYAY: in uu dhumay Jeegga Wareega Lam. 042945 lagana sameeyay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan Sh.So. 16.000/= kuna qoran magaca Ibraahim Ducaale Cilmi sida ku cad warqadda Lam. 10733 tr. 14.12.85 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYAY

in la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 042945 lagana sameeyay Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo aKydka Soomaaliyeed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 16.000/= kuna qoran magaca Ibraahim Ducaale Cilmi.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Ibraahim Ducaale Cilmi lacagta cadadkeeda yahay Sh.So. 16.000/= ee ku qornayd Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.12.85

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangolle)

L. 545

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA
TIDSI/MGH/15/85.
UJEEDDO:— Digireeto Cusboonaysiin Jeeg Wareega oo lumay Lambar yahay 590293.
Guddoomiyaha Max. G. W/Galbeed ee Hargeysa,
MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Digaale Cusmaan Caduur, ee ku Taariikheysan 11.7.85, uuna ku Codsanaayo Cusboonaysiinta Jeegga Wareega ee sare ku qoran ee lumay;
MARKUU ARKAY: Caddayntan Bangiga ee Lambarkeedu yahoy 1242 ee ku taariikheysan 17.8.85, ayna ku Caddeeyeen in Jeeggaas Lambarkiisu yahay 590293, lana sameeyey Taariikhdu markay ahayd 18.6.85 Lacagtiisuna dhan tahay 10,000/= Shilin, kuna yoraa Digaale Cusmaan Caduur, lagana sameeyey Bangiga Laanta Hargeysa;
MARKUU ARKAY: Qod. 60-70 ee X.L.Y. 2 ee soo baxay 9.9.65kii;
MARKUU ARKAY: In Lacagta Jeeggaas uu ku qoraa Digaale Cusmaan Caduur, iskana leeyahay ilaa hadda.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gaseeyo Jeegga Wareega ee lumay ee Lambarkiisu yahay 590293, loona Cusboonaysiiyo DIGAALE CUSMAAN CADUUR, Cusboonaysiintana gacanta laga saaro Jaallahaas ama Cid Awoor Buuxda ka haysata muddo 15 Casho gudahood ah ka dib maalinta Go'aanka laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Laanta Madaxtooyada J.D. Soomaaliya.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, in lagu dhejiyo Nuqulka Go'aankan Bangiga Irdihiisa si Ciddii haysata Jeeggaas Lumay ee kor lagu kansal gareeyey uga soo qortaan Cabasho haddii ay doonaan.

Hargeysa, 21.8.85

Guddoomiyaha Max. G. W/Galbeed Hargeysa
(Ibraahin Faarax Maxamed)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay uu lambar kiisu ahaa 27024 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 280.000/= uu iska lahaa Maxamed Cali Sabdullaahi sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 005130 taariikhdeedu na tahay 30.12.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65;

WUXUU FARAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 27024 ee ku qoran Maxamed Cali Cabdullaahi ayna ku jirto Sh.So. 280.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Xarunta u badalo Buug Kaydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.12.85

GARSOORAHA MGB

(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 547

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

TIRSI/MGH/29/85.

UJEEDDO: - Digireeto cusboonaysiin Jeegagga Wareega ee Lambarradoodu kala yihiin:- ee Lumay.

1) J.W.No. 631831 ee Sh.So. 20,000/=

2) J.W.No. 112623 ee Sh.So. 3.225/=

kuna qoran Maxamed Cali Qayre lana sameeyey 29.9.95.

Guddoomiyaha Max. G. W/Galbeed Hargeysa;

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Maxamed Cali Khayre, ee ku taariikheysan 20.10.85, uuna ku Codsanaayo in loo Cusboonaysiiyo Labada Jeeg Wareega ee lumay ee lambarradoodu kor ku qoran yahay;

MARKUU ARKAY: Caddaynta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, Lambarkeedu 1719 ee ku taariikheysan 16.12.85, laguna soo caddeeyey in laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, loona sameeyey Maxamed Cali Khayre, Lambarradooda iyo Lacagtooduna iyo Taariikhdooduba tahay sida kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: Qod. 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeegagga Wareega ee lumay lambarradooda iyo taariikhdooda iyo lacagtooduba kor ku qoran yihiin loona Cusboonaysiiyo MAXAMED CALI KHAYRaa, Cusboonaysiintana gacanta laga saaro muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib maalinta Faafinta lagu soo saaro, ama cid awood ka haysata Maxamed Cali Khayre.

WAXAA LA FARAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, in lagu dhejiyo Nuqulka Go'aankan Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeegaggaas Wareega ee lumay ee kor lagu kansal gareeyey uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Hargeysa, 22.12.85

Guddoomiyaha Max. G. W/Galbeed Hargeysa
(Ibraahin Faarax Maxamed)